

Brucellosis

Waa maxay brucellosis?

Brucellosis waxa weye cudur, ka mid ah bakteeriya, ku dhacda noocyoo badan oo xoolaha kala duwan – waxa ku jiraan Idaha, riyaha, lo’da, deerada, eeylada, doofaarka, iyo eeyaha. Hase yeeshoo, cudurka waxa ku hici kara dadka asaga oo calaamooyinkiisu u ek-yihiin haragabka. Dadka qaba brucellosis waxa lagu garta qandho, dhidid, madax xanuun, dhabar xanuun, iyo tabar yari ku timaada jirka.

Cudurka marka uu xumaado wuxuu gaara neerfiyaasha iyo xididada wadnaha. Nooc ka mid ah cudurka waxa keeni kara calaamooyin qaata waqtidheer, waxa ku jiraan qandho kulul, xubno xanuun, iyo daal aad u daran. Calaamooyinka waxay soo bixi karaan waqtii kasta laga bilaabo shan ilaa 60 maalmood ka dib marka cudurka ku dhaco qofka.

Cudurka brucellosis waxa la sheegaa in uu ku dhaco 100 ilaa 200 qofood oo keliya ayaa sanadkii loo soo wargeliya wadanka Maraykanka (U.S.). Inkasta oo cudurka brucellosis uu kaa dhigi karo qof aad u xanuunsan. Haddana aad bay u yartahay in uu noqdo cudur dilaa ah.


Sidee dadka u qaadaan cudurka brucellosis?

Dadku waxay bakteeriyyada cudurka brucellosis ku qaadi karaan

- cunid ama cabid cunto taabatay bakteeriyyada
- ku neefsashada bakteeriyyada
- meel dhaawac oo bakteeriyyadu gaarto



Communications Office
625 North Robert Street
PO Box 64975
St. Paul, MN 55164-0975
(651) 201-4989
www.health.state.mn.us



Bakteeriyyada
cudurka Brucellosis

Siyaabaha ugu badan ee caanka ah oo dadka ay ku qaadi karaan cudurka waxa weye cabitaan ama cunid cunto aan laga ilaalinin bakteeriyyada, caano ama farmaajo bakteeriyyada cudurka gaartay. Waxa kale oo aad ku qaadi karta adiga oo ku neefsada bakteeriyyada. Arrintaasna in yar bay dhacdaa, laakiin waxay khatar ku noqon karta dadka ka shaqeeya shaqooyinka qaarkood. Dadka ka shaqeeya sheybarka ama guryaha xoolaha lagu qalo. Xoolaha qaba dhaawac wata bakteeriyyada waxay halis gelin karaan dhakhtarka xoolaha, shaqaalah ka shaqeeya guriga xoolaha lagu gawraco, ama dadka xoolaha ugaarsatada. Dadka xoolaha ugaarsada waxay cudurka ku qaadi karaan ayaga oo cuna cunto si lama filaan ay u taabatay bakteeriyyada brucellosis, mudada ay ku hawlan-yihiin nadiifinta xoolaha duurjooga.

Waxa kale oo suuragal ah in dadka si u la kac ah loo qaadssiyo cudurka brucellosis, ayada oo hawada lagu sii deynayo bakteeriyyada cudurka ama loogu daro cuntada.

Cudurkan ma laga qaadi kara dadka kale?

Waxa suurgal ah dadka in ay is qaadsiyyaan cudurka brucellosis – laakiin aad bay u yartahay arrintaas. Marmar dic ah, hooyooyinka naaska nuujiya way u gudbin karaan bakteeriyyada ilmahooda. Bakteeriyyada waxa la isku gudbin kara galmaada.

Brucellosis – Pog 2

Ma la daweyn kara cudurka brucellosis?

Cudurka brucellosis waxa lagu daweyn kara dawada disha jeermiska cudurka (antibiotics) – laakiin waxay qaadan karta waqtidheer, daweyntana waxay noqon karta mid adag. Daweynta waxay ku xiran tahay darnaanta xanuunka ee cudurka – iyo marka daweynta bilaabato – waxay qaadan kartadhowr isbuuc ilaa bilo yar si looga dawoow cudurka.

Ma laga hortagi kara cudurka brucellosis?

Ma jiraan tallaal loo heli karo cudurka brucellosis. Hase yeeshee, waxa aad hoos u dhigi karta khatarta cudurka haddii aad ka fogaatid cunidda ama cabidda caanaha, farmaajada iyo jalaatada aan laga dhawrin bakteeriyyada marka aad safraaysid. Dadka xoolaha ugaarta waa in ay gashadaan gacmo gasho caag ah marka ay qalayaan neefka gudahiisaka.

Maxaa ka cudurka brucellosis ka dhigay mid loo adeegsan karo hubka argagaxiso?

Cudurka brucellosis wuxuu dadka u keeni kara xanuun waqtidheer socda – waxaana ka reebi kara ka dhigi kara hawlahaa caadiga – waqtidheer. Way fududahay in bakteeriyyada ayaa lagu qaadsiiyo dadka xanunka brucellosis. Inkasta oo aan dilaa hayan, wuxu ka dhigaya dad badan in ay xanuunka qabaan. Ogolaanshaha iyo baadi-goobka habka u dilaaco cudurka brucellosis dhib bay ku noqonaysa waaxda caafimaadka bulshada.

Maxa aan sameeya haddii aan u maleeyo in aan qaaday cudurka brucellosis?

Dadka rumaysan in ay qaadeen cudurka brucellosis waa in ay arkaan dhakhtar waxa kale oo la xiriirta hay'adda fulinta sharciga ee xaafaddaada haddii aad hayso sabab kasta oo ka shakisid waxa aan caadi ahayn oo la xiriira cudurka brucellosis ka dilaacay meesha – ama xalis kasta oo la xiriirta cudurka.